

Deyrka dushiisa **Daabacaadii 2 Oktobar ee 2009**

Toddobaadka Guriyeynta

Si fiican u baro deriskaaga inta uu socdo sannadkan dabaaldega Toddobaadka Guriyeynta. Ogow sida...

Qoraal ku saabsan: Jackie Dacey

Xiriiriyaha Jamciyada Kireystayaasha Dadweynaha Fiktooriya waxay naqala hadashay shaqadeeda.

La wadaag talladaada si wanaagsan u isticmaalka jardiinada waxaanad ku guuleysan kartaa.

Deyrka dushiisa

deganaha xaafada Portland Christopher Chapman ayaa ku guuleystay tartanka in dib loogu magacaabo wargeyska deganayaasha ee Akhbaarta Kireystayaasha.

“Waxaan ku noolahay goobaha guriyeynta dadweynaha mar ilaa labana toddobaadkii, waxaan la kaftamaa deriskayga derbiga. Waxaan isu sheegnaa warbixino oo aan la qabsanaa dhammaan haddalada ama xanta xaafada ka jirta.

“Maalin gaar ah waxaan hayey waxoogaa shaqo ah gaariga waxaana la kaftamayey markaas waxaan u qaatay inay taasi noqon doonto magac weyn oo lagu qoro wargeyska, “ waxaa yiri Mudane Chapman.

Tartanku wuxuu ahaa inaad magac cusub aad u keento wargeyska kireystayaasha, aad buuna u darnaa uuna lahaa waxyaalo badan oo kala duwan oo hal abuur leh oo ka imanaya gobolka oo dhan.

Mudane Chapman wuxuu ku guuleystay tigidhka V/Line ee maalin laha ah oo qorsheynayo inuu u isticmaalo safarkiisa Melbourne isagoo la socda lammaanahiisa ah LISA.

Marka loo eego Mudane Chapman “Abaalmarintan waxay timid wakhti aad u weyn maadaama aniga iyo xaaskeygu aan ka hadlaynay tegida Melbourne ilaa wakhti si aan u soo aragno bandhiga matxafka. Waanu faraxsanahay.”

Derbiga dushiisa waxaan had iyo jeer xiiseynaynaa inaan helno fikradahaaga iyo noocyada sheekooyinka iyo mowduucyada aad jeclaan lahayd in laga hadlo.

Usoo dir fikradahaaga:

The Editor
Office of Housing
PO Box 4057
Melbourne VIC 3000

ama iimeyl u soo dir:

overthefence@dhs.vic.gov.au

qof kastaa wuxuu u baahan yahay jimicsi

Dadka da'a kasta jira oo leh xaalad kasta oo jireed ayaa ka faa'iidi kara cunitaanka cunto nafaqo leh sidoo kalena jimicsanaya, maadaama bilihii diiraanaa ay soo socdaan xitaa way ka sii sahlan tahay inaad firfircoonaatid.

Cilmi baaris ayaa muujisay inaad firfircoonaatid ugu badnaan ilaa 30 daqiiqo maalintii ayaa waxay kaa dhigi kartaa inaad dareento wanaag, inay ku siiso tamar badan, iyo inay kaa yareyso khatarta jirada sida cudurka wadnaha iyo sonkorowga.

Waxaa jira siyaalo badan oo aad u firfircoonaan kartid haddii ay tahay barnaamijyo la habeeyey, nashaad madadaalo ama haddii caqligaaga aad adeegsataba.

Hal si ah oo weyn oo aad ku heli kartid faa'iidooyinka jirdhisnaanta iyo caafimaadba waxaa weeye inaad sameyso waxyaalo dhexdhexaad ahaan firfircoon sida lugeynta roclaha ah. Socodku waa mid ka mid ah nashaadka ugu fiican ee ah inaad sameyso si aad u hagaajisid caafimaadkaaga iyo fiiyoobidaadaba – waxaa jira khatar aad u yar oo dhaawac inuu ku soo gaaro waxna kuma yeeli doonto.

Had iyo jeer hubi inaad la tashatid dhakhtarkaaga ama qofka takhasuska caafimaadka leh haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan caafimaadka iyo jimicsiga.

Miyaad dooneysaa inaad ku guuleysato voucher \$50 ah oo aad wax kaga gadato Dukaanka weyn ee Coles ?

Maxaad qabataa sidaad caafimaad u hesho? Laga yaabo inaad qayb ka tahay kooxda socodka ee xaafada, ama aad ku firfircoon tahay jardiinka. Wax kastaba ha noqotee waa waxaad sameyso si aad caafimaad u hesho waxaana dooneynaa inaan kaa maqalno waxaas

noo sheeg talladaada caafimaad iyo fikrada ugu fiican ayaana ku guuleysaneysa \$50 oo ah voucher oo aad ku isticmaali karto Dukaanka Coles.

Toddobaadka Guriyeynta 2009 Baro deriskaaga – dhisida xiriiradaada

waa barbeque, suuqa magaalada weynta ka baxsan, ama mashruuca farshaxanka bulshada. Waxay noqon kartaa maalintii dhir abuurida ee guryahan, ama isu imaatanka dhaqamada badan ee qoob ka ciyaarka, ciyaaraha iyo cuntada.

Inta lagu jiro dabaaldega Toddobaadka Guriyeynta ee sannad laha ah ka dhaca goobaha guryaha dadweynaha ee Fiktooriya , waxaa jiri Susan Blackburn, iskuxiraha

ka qaybqaadashada kireystaha ee gobolka Magaala weynta Waqooyiga, " waxaa had jeer jira cunto."

toddobaadkii guriyeynta ee sannadkii hore wuxuu arkay qaar ka mid ah 80 dhacdooyin oo kala duwan oo ay soo qabanqaabiyeen magaalo weynta iyo xarumaha gobolada halkaas oo lagu martiqaaday kireystayaasha guryaha dadweynaha inay ku soo biiraan.

"Waa degaano aad u wanaagsan," ayey tiri, "halkaas oo kireystayaashu ay isla hadli karaan midba midka kale, oo ay wadaagi karaan macluumaad ama ay bartaan qof ay badanaa wadada isku dhaafaan".

Toddobaadka Guriyeynta 2009 – **"Barro Deriskaaga Dhisida Xiriiradaada"** - waxaa la qaban doonaa 26 Nofeembar- 3 Diisembar Fiktooriya oo dhan sidoo kale Sharon Prentice, ku simaha xiriiriyaha ka qaybqaadashada kireystaha ee Gobolka Hume, waxay leedahay toddobaadku wuxuu noqon karaa mid khaas ahaan muhiim ugu ah magaalada gobolada kale.

Shaqaalaha guriyeynta iyo hay'adaha kale ee taageerada badanaa waxay ka soo qayb galaan dhacdooyinka Toddobaadka Guriyeynta waana la helayaa si ay qaybiyaan warqadaha macluumaadka oo kaala hadlaan adeegyada, nashaadka iyo koorsooyinka xaafada ee ka soo qaybgalayaashu laga yaabo inaysan ka warqabin inay ka jiraan goobahooda.

"dadka qaarkii ma gartaan inay caawimaad weydiisan karaan ama tilmaan, xitaa haddii ay qaataan warqad maalintaas oo ay la tagaan, haddow way soo wici karaan si ay helaan wax ku saabsan adeegyada ay heli karaan sannadka oo dhan."

Dhacda Toddobaadka Guriyeynta, Susan waxay leedahay "waxay ku saabsan tahay u dabaaldegida xiriirada waana dhacdooyin farxad leh. Waa fikrad wanaagsan."

wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan waxa ka dhacaya gobolkaaga inta lagu jiro Toddobaadka Guriyeynta 2009, la xiriir xafiiskaaga xaafada ee guryaha ama gal www.housing.vic.gov.au/housing-week .

Magoolka ubaxu waa fikrad weyn (Blooming great idea)

qayb ka noqo tartanka jardiinada maqoolka ee fiktooriya muujina garaadkaaga sare iyo isticmaalkaaga biyaha jardiinka ee waxgaradnimada leh!

Ttartanka jardiinada maqoolka ee fiktooriya wuu furan yahay hadda waxaanad ka geli kartaa qaybahan soo socda:

- Jardiinka guriga ugu biyo isticmaalka fiican
- Jardiinka goobaha la wadaago ee ugu biyo isticmaal fiican
- Jardiinka yar ee xiran ama barandada ugu biyo isticmaalka fiican
- Jardiinka ugu biyo isticmaalka fiican
- Jardiinka ugu halabuurka isticmaalka biyaha fiican (oo taageereyso Jardiinooyinka Rotal Royal Botanic)
- Booska shakhsiyeed ee ugu biyo isticmaalka fiican (jardiinooyinka bulshada)

dadka ka soo gala gobolada waxay heli doonaan voucher dhan \$50 kuwa dawlad goboleedka oo dhan ka soo galana waxay heli doonaan voucher dhan \$100 oo ay ku isticmaalaan qalabka jardiinka.

si aad u diiwaangeliso gelitaankaaga fadlan wac lambarka bilaashka ah ee **1800 663 662** ugu danbeyn 17 Nofeembar 2009.

wixii macluumaad dheeraad ah waxaa laga helayaa www.housing.vic.gov.au ama iimeyl vicbloom@dhs.vic.gov.au.

Qoraal ku saabsan:

Jamciyada Kireystayaasha Guryaha Dadweynaha ee Fiktooriya

Bisha Janaayo sannadkan, Jackie Dacey waxay noqotay mid ka mid ah wejiyada Jamciyada Kireystayaasha Dadweynaha ee Fiktooriya. Iyadoo leh aqoonsi waxbarasho oo ah horumarinta bulshada iyo maamulka guriyeynta iyo siyaasada, shaqadeeda cusubi waxaa weeye inay hubiso in kireystayaasha gobolka ee dhan 65,000 ah kireystayaasha guryaha dadweynaha waxay ku leeyihiin cod weyn waxyaalo badan oo la xiriiira maamulida guryaha dadweynaha.

Kireyste kasta wuxuu noqon karaa xubin ka tirsan VPTA – ku soo biiridu waa bilaash - Jackie, oo hadda buuxineysa doorka ah xiriiriyaha, waxay rabtaa inay ku dhiirigeliso kireystayaal fara badan inay ka qayb galaan waxqabadka hay'dan sare oo rabta inay ka siiso kireystayaasha kontorool weyn degaankan ay ku nool yihiin iyo awoodii ay ugu soo jeedin lahaayeen fikradahooda si toos ah Dawlada iyo Xafiiska Guryaha.

Guryaha dawladu waa wax dhib badan, kala duwan, dhaqamo badan iyadoo ay jiraan arimo gaar iu ah guryaha , qaar, waxaa yiri Jackie, " waa kuwo nidaamsan oo aad caam u ah".

Arinta VPTA waxay ahayd wax ka qabashada sida dhibaato isku mid ah loogu arko guryaha kale iyo sidii VPTA ay uga shaqeynayso inay bedesho.

Su'aasha ah gaari dhigashada kireystayaasha oo qaadatay dadka aan degenayn ee aan ka heli karin gaari dhigasho wadooyinka dadweynaha, waa caamku ah guryaha dadweynaha ee maagaalo weynta ku yaal, Jackie ayaa sidaa tiri. Kireystayaasha laga qaatay gaari dhigashadooda ka dib waxay ku khasabtaa inay gaarigooda dhigtaan wadooyinka ugu danbeyntiina waxay arkaan iyadoo la ganaaxay.

VPTA waxay kala shaqeyneysaa Xafiiska Guryaha inay siiso inay bixiso si wanaagsan oo loo ilaaliyo gaari dhigashada guryaha si kor loogu qaado arintan.

Ms Dacey waxay tiri VPTA waxay haddaba siisaa taageero iyo tababar 31 kooxood oo kireystayaal ah laakiinse mid ka mid ujeedooyinkooda ugu weyni waa inta lagu jiro sannadkeeda ugu horeeya ee shaqadan waxaa weeye inay kordhiso tirada xubnaha kireystayaasha ee xubinta ka noqda.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan sidii aad ku noqon lahayd xubin ah VPTA, sidii aan kuu sii caawin lahayn, fadlan wac **9481 4500** ama **1800 015 510** ama gal www.vpta.org.au .

Tuur qashinka

Ma heysataa alaab gabowday, weelka cuntada lagu kariyo, ama dhar aadan u baahneyn oo guriga boos kaa buuxiyey?

Si aad u hesho sidii aad ku tuuri lahayd alaabta aadan u baahneyn, deganayaashu waa inay had iyo jeer la xiriiraan golaha xaafada. Dhigida alaabo gurigaaga hortisa ama wadada sharciga ayey ka soo horjeedaa waxayna keeni kartaa ganaax ama xitaa inaad maxkamad tagto.

Golaha waxaa laga yaabaa inuu kugula taliyo ururinta waxyaalaha halaabay ee aan loo baahneyn, geynta alaabada saldhiga lagu rogo ama lagu wareejiyo, sameynta qof inuu ururiyo alaabta ama xitaa siinta alaabtan hay'adaha sadaqada qaata.

Gurigaaga , Xaqaaga

codsi cusub oo ah Xafiiska Guriyeynta oo la yiraahdo **Adiga iyo Gurigaaga** wuxuuna qorayaa masuuliyadaada iyo xuquuqdaada ee dadka ku nool guryaha dadweynaha waxaana la siiyaa dhammaan kireystayaasha cusub.

Daabacaada midabada badan waa ka mid ah macluumaad faa'iido leh oo ah waxay dadku sameyn karaan si ay uga dhigaan ku noolaanshaha guryaha dadweynaha kuwo lagu raaxeysto ilaa intii suurtoagal ah, oo ay ka mid tahay fikrad soo jeedinta xalinta isafgaranwaaga, macluumaadka bixinta kirada guryaha, iyo wixii aad ka sameyn lahayd baahida dayactirka.

Fariinta cad ee ku taal buuggan yar waxaa weeye in kireystayaashu ay xaq u leeyihiin inay rajeeyaan in adeega uu siinayo Xafiiska Guriyeyntu uu yahay mid caddaalad ah, dhakhsa ah, daacad ah iyo ka jawaabid leh.

Iwaxaa la mid ah, deganayaasha guryaha dadweynaha in laga rajeynayo ilaalinta masuuliyadaada iyo xuquuqda uu ka kooban yahay heshiiska kireysigu ee la siiyey ka hor intayan soo guurin.

Haddii aad dooneysid macluumaad intaa sii dheer oo ku saabsan masuuliyadaada iyo xuquuqdaada degenaha guryaha dadweynaha awgood, ama aad jeclaan lahayd nuqulka **Adiga iyo Gurigaaga** la xiriir xafiiska guryaha ama gal www.housing.vic.gov.au .

Guryo la isticmaali karo

kireystayaasha leh baahiyaha iinta, waxyaalaha tooska ah sida furida tuunbadu ayaa ku noqon karta wax dhib badan.

Tani waa sababta in dhammaan guryaha cusub ee dadweynaha dhammaantood hadda ay u leeyihiin qaabab muhiim ah oo ah inay isticmaalaan dadka baahiyaha khaaska leh.

Sannad kasta Xafiiska Guryuhu wuxuu ku kharashgareeyaa wax ka badan \$2.5 milyan si ay uga dhigaan guryaha hore u jiray kuwo aad loo isticmaali karaan dadka leh baahiyaha dheeraadka ah.

Qaar ka mid ah qaababkaan dheeraadka waxaa ka mid ah:

- Biro la qabsado oo ammaan oo guriga gudihiisa iyo bannaankiisaba ku yaal
- Ku rakibida meelaha nanalalka laga shido oo waaweyn,
- Siinta nooc sahlane levelka tuunbooyinka biyaha iyo meelaha la qabto albaabka,
- isticmaalka musqusha qubeyska oo la hagaajiyey,
- Ku rakibida alaarmiga araga ee kireystayaasha magalka wax ka qaba

haddii aad u baahan tahay wax ka bedelida gurigaaga ee qofka iinta leh, waa inaad u keentaa xafiiska guryaha warqad midkood dhakhtarkaaga ama dhakhtarka dhaqdhaqaaqa ama qofkale oo takhasus caafimaad leh.

Kireystayaashu waxay faafiyaan hadalka ah ammaanka dabka

dababku waxay ka qaadi karaan dadka naftooda iyo maalkooda.

Khatarta dabka ee deganayaasha iyo hantida waa la yareyn akraa iyadoo isha lagu heynayo wixii dab shidan ah oo aan daboolneyn, taxadarida marka wax la karinayo.

Si ay uga caawiso faafinta hadalka deganayaasha dhexdooda, Xafiiska guryuhu wuxuu bilaabayaa bilow ah shaqo iyo tababar si uu u siiyo kireystayaasha xirfadaha lagama maarmaanka ah si loo baro laguna wargeliyo bulshooyinkooda xaafada.

Kow iyo toban kireystayaasha guryaha dadweynaha ah ayaa dhameynaya Oktoobar gurdaheeda (iyadoo ay isku mar dhacayaan oo ay isku soo beegmeen Bisha Amaanka Bulshada ee Fiktooriya) oo ay diyaar u yihiin jeedinta hadal ku saabsan ammaanka dabka iyadoo ay la jiraan Xafiiska guryaha.

Kireystayaasha waxaa lagu tababarey Shahaadada 3 ee Ammaanka Bulshada oo ay ku qabteen Swinburne TAFE kaniisada all Nations ee Carlton.

Maamaama ay yihiin kuwo ka mid ah oo soo jeedinaya hadal ku saabsan macluumaad ku saabsan ammaanka dabka bulshooyinkooda xaafada iyo marmarka qaarkood luuqadahooda bulsho.

Aqoonsigan waxbarasho wuxuu siinayaa xirfadii loo baahnaa ee dadka ka shaqeeya ururada ammaanka dadweynaha ee mihnadaan oo dhan.

Deganayaasha North Melbourne, Ms Josie Hill, barnaamijka waxbarashadu wuxuu noqday mid awood siinaya oo kicinaya sidoo kale.

“Aad iyo aad baanan uga caga jiidayey markii koowaad inaan ku lug yeesho sababtoo ah da'deydan inaad dib ugu noqdo waxbarasho waxay iila muuqatay wax aad u xun.

Hadda, shan iyo badh maalmood ka dib I eeg waxaan hayaa wax badan oo aan la wadaago dadka kale.”

haddii aad xiiseynaysid inaad ka qaby qaadatid Barnaamijka Shaqada Kireystayaasha guryaha dadweynaha (PTEP) la xiriir **1800 451 553** ama iimeyl u dir ptep@dhs.vic.gov.au .

Haddii aad jeclaan lahayd inaad u sameyso haddal kooxdaada kireystayaasha ee guryaha dad weynaha oo ku saabsan ammaanka dabka la xiriir 03 9096-5376.

Tallo: Heyso qabowgaaga xaggaagan

xaggaagii oo halka yimid haddaba waxaa jira waxyaalo badan oo aad sameyn kartid si aad u qabowdo, khaas ahaan marka heerkulka wakhtiga maalintii uu ku darsamo habeenadii celcelis ahaan.

Maalinta kulul waa inaad hubisaa:

- Cab biyo fara badan iyo dareere (iska ilaali khamrada) (Ogow: haddii dhakhtarkaagu caadi ahaan uu xadido dareeraha aad qaadaneysa ama aad qaadato kiniigiga dareeaha, waxaa laga yaabaa inay fiican tahay inaad ka jeegareyso isaga ilaa intaad cabi kartid marka hawadu kulushahay);
- biyo qabow ku qubeyso ama ku maydho;
- xiro dhir debecsan, waxaa la doorbidayaa suuf midab khafiifa leh;
- jeegaree dadka da'da ah , jiran iyo kuwa tamarta daran oo laga yaabo inay u baahan yihiin caawimaad si ay ula qabsadaan kulka;
- ha isku haleyn marawaxadaha ilaa inay jirto meel hawado ka waxdo oo ku fulan mooyee fiidkiina fur daaqaadaha isticmaalna marawaxadaha si aad u sameyso neecow isdhaafitaan;
- xir daahyadaada iyo shiraaqa daaqaada maalintii si aad uga xirto qoraxda;
- baro callaamadaha iyo astaamaha kuleylka fara badan markaad la kulanto sidii aad ugu jawaabi lahayd.

Iyo haddii aad bannaanka joogto waa inaad hubiso waa inaad **slip, slop, slap** adoo isticmaalaya iskiriinka qoraxda, koofiyad, daboolaya jirka quraxdu ku dhaceyso iyo adoo marmar badan cabaya biyo badan.

Dheh 'hi' deriskaaga inta lagu jiro toddobaadka Guriyeynta

iyadoo ay ku hadlaan luuqado aad u badan deganayaasha guryaha dadweynaha waa hubaal inaad ka hesho salaan aad isticmaali karto liiskan hosoe .

Luuqada	Salaanta
Arabic	Salaam aleikum
Amharic (Ethiopia, Israel, Egypt)	Teanastellen
Bosnian	Zdravo
Cantonese	Ni How
Croatian	Zdravo

Dari (Afghanistan)	Chotor asty
Greek	Yah su
Hebrew	Shalom
Hindi	Na-mast tey
Hungarian	Jo napot
Italian	Buon giorno
Khmer	Sok sabai jie te
Macedonian	Zdravo
Mandarin	Ni How
Polish	Dzien dobry
Romanian	Buna
Russian	Halo
Serbian	Zdravo
Somali	Maalim wanaqsan
Spanish	Hola
Sudanese (Dinka)	Chubuk
Tigrinya (Eritrea and Ethiopia)	Selam
Turkish	Merhaba
Vietnamese	Chao

Fadlan ogow – macluumaadkan waxaa laga soo qaatay website -do kala duwan.

Xafiiska Guriyeynta — Xiriirada Xafiisyada Gobolada

North West Metro region	Ascot Vale	12 Churchill Avenue, Ascot Vale 3032	(03) 9371 6200
	Broadmeadows	56 - 58 Coleraine Street, Broadmeadows 3047	(03) 9309 1255
	Carlton	480 Lygon Street, Carlton 3053	(03) 9341 8200
	Collingwood	229 Hoddle Street, Collingwood 3066	(03) 9417 5144
	Fitzroy	90 Brunswick Street, Fitzroy 3065	(03) 9417 7322
	Footscray	71 Moreland Street, Footscray 3011	(03) 9275 7516
	North Melbourne	33 Alfred Street,	(03) 9326 6377

		North Melbourne 3051	
	Preston	679 - 685 High Street, Preston 3072	(03) 9479 0122 or 1300 664 977
	Richmond	112 Elizabeth Street, Richmond 3121	(03) 9429 5174
	Sunshine	16 - 18 Hertford Road, Sunshine 3020	(03) 9312 5022
Southern Metro region	Cheltenham	Level 2, 4 - 10 Jamieson Street, Cheltenham 3192	(03) 8585 6200
	Dandenong	Level 4, 311 - 319 Lonsdale Street, Dandenong 3175	(03) 9767 8777
	Frankston	Level 1, 431 Nepean Highway, Frankston 3199	(03) 9784 3200
	Prahran	259 Malvern Road, South Yarra 3141	(03) 8646 3600
	South Melbourne	Level 2, 20 Clarendon Street, South Melbourne 3205	(03) 8646 3600
Eastern Metro region	Box Hill	883 Whitehorse Road, Box Hill 3128	(03) 9843 6577
	Ringwood	25 Ringwood Street, Ringwood 3134	(03) 9871 5199
Barwon South West region	Colac	54b Bromfield Street, Colac 3250	(03) 5231 2574
	Geelong	Level 2, State Government Offices, corner Fenwick and Little Mallop Streets, Geelong 3220	(03) 5226 4540
	Hamilton	50 Thompson Street, Hamilton 3300	(03) 5571 9114
	Portland	16 Julia Street, Portland 3305	(03) 5523 9999
	Warrnambool	Shop 2 109 Lava Street, Warrnambool 3280	(03) 5561 9444
Loddon Mallee	Bendigo	74 - 78 Queen Street, Bendigo 3550	(03) 5434 5555 or 1800 645 329

region	Mildura	253 Eleventh Street, Mildura 3500	(03) 5022 3111
	Swan Hill	210 Beveridge Street, Swan Hill	(03) 5032 0100
Grampians region	Ballarat	Corner Mair and Doveton Streets, Ballarat 3350	(03) 5333 6660
	Horsham	21 McLachlan Street, Horsham 3400	(03) 5381 9777
Hume region	Benalla	26 Church Street, Benalla 3672	1800 635 862
	Seymour	16 Station Street, Seymour 3660	1800 680 694
	Shepparton	163 Welsford Street, Shepparton 3630	1800 631 439
	Wangaratta	43 - 47 Rowan Street, Wangaratta 3677	1800 818 540
	Wodonga	55 Hovell Street, Wodonga 3690	(02) 6055 7777 or 1800 644 873
Gippsland region	Bairnsdale	7 Service Street, Bairnsdale 3875 (by appointment)	(03) 5144 9100 or 1800 674 624
	Morwell	7 - 11 Hazelwood Road, Morwell 3840	5136 2400 or 1800 650 813
	Sale	150 York St, Sale 3850	(03) 5144 9100 or 1800 674 624

Xarunta Wicitaanka Dayactirka Guryaha : 13 11 72

Haddii aad jeclaan lahayd inaad hesho daabacaadaan si **isticmaal fiican**, fadlan taleefan u soo dir **1800 663 662** ama iimeyl clientservices.housing@dhs.vic.gov.au

Waxaa daabacay Xafiiska Guryaha, Dawlada Fiktooriya ,
Wasaaradda Adeegyada bani'adamka, Fiktooriya, Australia

© Xuquuqdu waxay u xafidan tahay Dawlada Fiktooriya 2009

Oo sidoo kale laga helayo: www.housing.vic.gov.au

Waxaa idmay Dawlada Gobolka Fiktooriya,
50 Lonsdale Street, Melbourne.